**Xeerka 29 Agoosto 1957, lamba. 28 rep.**

**Qayb Madaxbannaan oo loo dhisay amaahda dhismaha "Amaahda Soomaalida"**

## MAAMULAHA

Marka uu arkay Xeerka 7 Maajo 1956, lamba. 1 "dhismaha Xukuumadda Soomaaliya";

Marka uu arkay Dekereetada 18 Maajo 1956, lamba. 78 "Xeer nidaamiyaha Xukuumadda Soomaaliya";

Marka uu arkay Xeerka 30 Setember 1956, lamba. 10 "Ballaarinta Hawgalada Amaahda Soomaalida";

Marka uu garowsaday in ay habboontahay in laga abuuro Amaahda Soomaaliya Qayb madaxbannaan oo ku saabsan dhismaha una u xilsaaraan in ay bixiso amaahda dhismaha;

Marka uu arkay talada Guddiga Ilbaadinta ay ku waafaqeen fadhigooda 26 Agosto 1956;

Marka uu dhagaystay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha.

## WUXUU DEKEREETO KU SOO SAARAYAA

### Qod. 1

Waxaa la oggolaaday in laga dhiso Machadka amaahda ee Xaqa Guud "Amaahda Soomaalida" Qayb madax bannaan ee qaabilsan dhismaha.

Qaybta madaxa bannaan ee amaahda dhismaha waxay leedahay shaqsiyad qaanuuneed iyo hanti iyo miisaaniyad ka gaara midda Amaahda Soomaaliya.

### Qod. 2

Hadafka qaybta madaxa bannaan ee amaahda dhismaha waa in ay hagaajiso bixinta amaahda dhismaha, dhismaha guryha la dego ee rayidka.

### Qod. 3

Amaahda waxaa lagu bixinayaa hawlgal kasta oo maaliyadeed ee ku saabsan dhismaha, dhalanrogga, ballaarinta iyo dabaq-saaridda (fooq) guryaha rayidka ee la dego iyadoo lagu saleynayo qaabka Xeerka Qaybta loo jideeyay iyadoo qiima dhacacooduna (ammortamento) uu nidaamin doono dhismaha ku habboon.

### Qod. 4

Dammaanadda raasamalka la amaahday iyo dulsaarka u bislaaday, Qaybtu waxay ku helaysaa, diiwaangelinta heshiiska amaahda, mudnan sharciyeed shayga amaahda dhismaha oo isla markiiba ay raacayaan waxayaabaha u sugnaaday Maamulka Dawladda sida ay qabaan axkaamta jirta. Mudnaantaas waxaa ku siyaadaya dammanadaha caadiga ee rahanta iyo kuwa dabeecadaha kale leh oo ku quran Xeerka Qaybta iyo heshiiska amaahda.

### Qod. 5

Hawlgallada shaqada ee Qaybta madax bannaan ee amaahda dhismaha waxaa ilbadin ku leh, Guddiga Ilbaadinta, oo ka dhisan Wasaaradda Arrimaha Dhaqaalaha sida uu qabo qod. 3 ee Xeerka 30 Setember 1956, lamba. 10, iyadoo loo hoggaansamayo isla qodobka 3 ee lagu sheegay Xeerka Qaybta.

### Qod. 6

Hantida Qaybta Madaxa bannaan waxay ka koobantahay:

a) qalab lacageed oo ah Sh. So.500.000;
b) wixii deeqo kale ee Xukuumaddu Soomaalia ay bixiso;
c) deeqo lacago lumay, hibada, shardi leh ama kuwa madax baanan nooc kasta;
d) siismada am ka qaybgalka wakaalado kale oo daneya horumarka dhismaha;
e) lacagta keydka

Siismada iyo ka qaybgalka kale waa in lagu oggolaadaa qaraar ka soo baxay Wasiirka Arrimaha Dhaqaalaha, marka la helo talada oggolaashaha Guddiga Ilbaadinta, lana dhagaystay Golaha Wasiirada iyagoo aan bixin Karin wax ka badan 49% hantida idil ee Qaybta. 40% hantida la soo sheegay qalabaynta hawgalada hore waxay gaar u tahay shaqaalaha dawladda iyado lagu saleynayo xeerka nidaaminaya bixinta amaahda dhismaha ee shaqaalaha dawladda. Xaaladaha ku saabsan kordhinta rasamaalka qalabaynta waxaa lagu nidaaminayaa qaraar la soo raaciyo, qoondaha loo gaar yeelay shaqaalaha dawladda.

**Qod. 7**

Qaybty waxay la wadaagtaa Amaahda Soomaalida xubnaha soo socda:

a) Golaha Maamulka oo lagu kordhiyo sarkaal ka socda Wasaaradda Arrimha Guud marka la meelmarinayo amaahda ay weydiisteen shaqaalaha dawladda oo ku saleysan axkaamta gaarka ee nidaaminaya arrimaha amaahda dhismaha ee la siinayo shaqaalaha dawladda;
b) Guddiga Fulinta;
c) Guddiga Baarista;
d) Agaasimaha;

iyagoo leh awoodda uu siinayo xeerka lagu dhisay Amaahda Soomaalida iyo Xeerka la xariira.

**Qod. 8**

Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Amaahda Soomaalida waa isla Guddoomiyaha Iyo Agaasimaha Qaybta.

**Qod. 9**

Waxqabadku wuxuu bilaabanayaa 1 Jannaayo wuxuuna dhammaanayaa 31 Disember sanad kasta. Waxqabad ugu horreeya wuxuu ku bilaabanayaa taariikhda 1 Setember 1957 wuxuuna xirmayaa 31 Disember 1957.

Qaabka iyo shuruudaha wax lagu samaynayo iyo wax lagu soo bandhigayo miisaaniyadda waxay ku caddahay xeerka.

Faaiidooyinka idiil ahaantooda ee kharaska saafiga iyo khasaaraha la soo gudboonaday waxqabadka waxaa loo qaybinayaa qaabka uu xeerku qorayo.

**Qod. 10**

Marka Guddiga Ilbaadinta tala ku soo jeediyaan iyo talada Wasiirka Arrimaha Guud, lana dhagaysto Golaha Wasiirada, Maamuluhu wuxuu kala diri karaa wuxuuna amrayaa xaq-bixinta Qaybta, arrintaasna waxaa qabanaya guddi xaq-bixin oo isagu magaacaabo xaaladaha soo socda:

a) markii la xaqiijiyo gefaf iyo xadgudubyo culus ee xeerka, xeer nidaamiyaha iyo axkaamta kale oo lagu nidaaminayo Qaybta;
b) marka la xaqiijiyo khasaare isku fuuqsaday, ka sokow lacagtii keydka lagu dhisay, oo ay sii raacdo wax ka badan kala barka hantidii Qaybta;

c) Marka la xaqiijiyo u qalmid la'aanta Qaybta in ay gaarto hadafkeedi dhabta.

Marka lakala diro Qaybta, Maamulaha Soomaaliya, uuna tala ku soo jeediyo Wasiirka Arrimaha Guud, wuxu dekereeto ku amarayaa in loo weeciyo hantida saafiga ee Qaybta ulalajeeddo dan guud

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.

P. Maamulaha
**P. Franca**

**Cabdullaahi Ciise Maxamuud**

**Xaaji Faraax Cali**

Waxaa lagu oo lagu diiwaangashay – Diw. lamba. 4, bogga lamba. 163.

Muqdisho, 29 Agoosto 1957.